

### *Ilaha Waalidiinta/Mas'uulka* ee Qorshaha Waxbarashada Shakhsiga (Individual Education Plan) (IEP)

#### Waa maxay IEP?

- Waa dukumiinti qofka loo diyaariyay kaasoo qeexaya waxa canuggaagu dugsiga ku baranayo maalinkii. Waxaa lagu saleeyay qiimaynta ogaanta awoodda, waxyaabaha uu rabo, iyo baahiyaha canuggaaga.
- IEP waxaa kujiri kara diyaarinta, iyo/ama wax ka badalada.

#### Ma ogtahay?

- IEP waxaa sameeyay koox isku xiran. Kooxaha IEP waxaa kamid ah adiga, canuggaaga, baraha canuggaaga, maamulaha, shaqaalaha taageerada iyo hay'daha bulshada (hadday macquul tahay).
- Awoodaha, rabitaanada iyo baahiyaha canuggaagu ayaa la tixgalinayaa marka la qorshaynayo diyaarinta iyo/ama wax ka badalada.
- Maamulaha dugsiga ayaa mas'uul ka ah xaqiijinta in IEP-yada la sameeyo, dib loo eego, la casriyeeyo lana meelmariyo.
- IEP-ga waa in si joogto ah looga dooda, dib loogu eegaa loona muraajaceeyaa si canuggaagu uu u gaaro hadafyadiisa waxbarasho ama uu ugu baahan yahay istiraatiijiyado dheeraad ah si uu u guulaysto.

#### Waa maxay kaalintaadu?

- La wadaag arimaha caafimaadka, daawada iyo/ama macluumaadka kale ee khuseeya canuggaaga dugsiga.
- Ka qaybgal kulamada IEP si aad falcelin uga samayso qorshaha.
- La wadaag istiraatiijiyado ama qaabab aad ku shaqayso markaad guriga joogto ama saaxiibada bulshada.
- Weydii macalinka canuggaaga haddii aad qabto wax su'aal ah oo ku saabsan IEP gooda.

Fadlan u tixraac Taxaneyaasha Muuqaalada ah ee Macluumaadka Adeegga Khaaska ah ee HWDSB si aad u hesho macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan mowduucyada la xiriira waxbarashada gaarka ah, oo ay kamid yihiin IEP-yada.

Wax badan ka ogow halkaan [www.hwdsb.on.ca/about/special-education](http://www.hwdsb.on.ca/about/special-education)